

# Xeerarka amaaneysiga

## Ku soo dhawow!

Wanaanu rajeynaynaa inaad ka faa'iideysanayso kaadhkaaga maktabada!

**Waxaad ka amaaneysan kartaa buugaag, filimo, muusig, ciyaaraha TV-ga, joornaalo iyo waxyaale kale oo badan oo aad ka heli karto folkbiblioteken iyo basaska buugaagta ee Göteborg.**

Waa lacag la'aan in la amaaneysto, laakiin waxa jira shuruuc aad u baahan tahay inaad raacdo. Bushqadan yar ayay ku dhigan yihiin waxyaalaha ugu muhiimsani ee aad u baahan tahay inaad ogaato.

## Dokumententi shakhsi ah

Kaadhka maktabadu waa dokumententi shakhsi ah. Haddii uu kaa lumo waa inaad isla markaaba xidho.

**Waxaad kaadhka ka xidhi kartaa habeen iyo maalinba adigoo soo wacaaya telefoonka, 031-368 34 34.**

Diiwaan galinta Adiga ayaa masuul ka ah wax kasta oo lagu amaaneysto kaadhkaaga – xataa wixii cid aan xaq u laheyni amaaneysto. Waalidka/Masuulka carruurta ayaa ka masuul ah kaadhka iyo amaaneysiga carruurta ay qaataan.

## Xiliga amaaneysiga

Xiliga amaaneysiga ayaa caadi ahaan ah seddex todobaad iyadoo aad heli doonto risiidh ay ku dhigan tahay xiliga amaanaada la soo celinaayo. Adiga ayaa ka masuul ah amaanaada ilaa iyo inta aad soo celinayso iyada.

**Bogga [www.gotlib.goteborg.se](http://www.gotlib.goteborg.se) ayaaad ka helaysaa wax kasta oo la amaaneysan karr halkan ayaaad dib uga amaaneysan kartaa, keydsan/xejisan kartaa iyadoo aad ka arki karto mudadda amaaneysiga.**

Haddii waxaad amaaneysatey uu dhaawac soo gaadho ama uu lumo ayay tahay inaad kaas mag dhowdo. Maktabadu masuul kama aha dhaawaca ku salka leh cilado farsamo markaad isticmaashay waxyaalaha miidiyada.

## Deynta lala raago

Haddii aanad waxyaalaha aad amaaneysatey ku soo celin waxkhtigii loogu tallo galay ayay tahay inaad bixiso kharash. Waxaad adeeg dheeraad ah oo kale ku dalban kartaa in sms-qoraal ah ama email lagu soo diro. Markaas ayaa lagu soo diri doonaa xasuusin laba maalmood ka hor iyo hal maalin ka dib xilligii la soo cellinaayey. Boosta caadiga ah ayaaad ku helaysaa warqad kuu sheegeysa in amaahdii lala habsamey laba todobaad xilligii la soo cellinaayey ka dib. Biilasha aan la bixin waxa loo gudbinayaa inkasso.

**Adiga ayaa ka masuul ah inaad cusbooneysiyo macluumaadkaaga xidhiidhka haddii ay is badalaan.**

## Kharashka

Kaadhkaaga maktabada ee ugu horeeya waa lacag la'aan, kaadh kale oo cusub oo qofka weyn ahi qiimihiisu waa 25 kr iyadoo uu 10 kr yahay carruurta.

Deynta lala raago: 3 kr/maalintii, ugu badnaan 60 kronor/midkiiba.

Filimada la kireysto: 5 kr/maalintii, ugu badnaan 100 kronor/midkiiba.

Waa inaad mag dhowdo alaabta aad amaaneystey ee dhaawaac soo gaadhay ama luntay.

Kharashaadkan ayaa isbadeli kara muddo kadib.

## Diiwaan galinta

Waxaad amaaneysato ama aad xejisato ayaa la diiwaan galinayaa.

Macluumaadkaaga waa qaar la ilaaliyey iyadoo la masaxi doono marka aad soo celiso amaanaada. Haddii ay deyn maktabadu kugu leedeey ayay taasi ku jireysaa diwaanka ilaa inta la bixinaayo. Haddii ay deyntaadu ka badato 100 kr ayaa la xanibayaa/xakameynayaa kaadhkaaga maktabada ilaa inta taas la bixinaayo.

## Kombiyuutaro

Maktabada waxa yaala kombiyuutaro lacag la'aan ah in la isticmaalo.

**Bogga [www.gotlib.goteborg.se](http://www.gotlib.goteborg.se) ayaaad ka helaysaa wax kasta oo la amaaneysan karro halkan ayaaad dib uga amaaneysan kartaa, keydsan/xejisan kartaa iyadoo aad ka arki karto mudadda amaaneysiga.**

**Waa inaanad raadsan ama ku daabacin waxyaalaha sawirada qaaqaawan, waxyaalaha cunsuriyada ama waxyaalaha sharci darada ah. Waa in aanad isticmaalin qof kale lambarkiisa sirta ama aqoonsigiisa.**

Dhowr qalabka farsamada, u sheeg shaqaalaha haddii ay ciladi ku timaado, iyadoo aad ka fikirayso dadka ku garab jooga.

**Biblioteken i Göteborg**  
**[www.goteborg.se/bibliotek](http://www.goteborg.se/bibliotek)**

## Aqbalaada sharciyada

Waxaan akhristey sharciyada iyo nidaamka amaaneysiga ee maktabadaha Göteborg. Waxaan aqbalayaa inaan raaco oo aan ka war hayo wixii isbadel ah ee ku yimaada sharciyada.

Lambarka maktabada:

Lambarka telefoonka:

Emaylka:

Saxeexa:

## Aqbalaada sharciyada iyo ogolaanshaha in dadka da'yarta ay helaan kaadhka maktabada

Waxaan aqbalayaa inuu wiilkeygu helo/gabadheydu hesho kaadhka maktabada iyadoo aan akhristey sharciyada maktabada Göteborg.

Saxeexa masuulka:

Magaca oo daabacan:

Emaylka masuulka:

Lambarka shakhsiga ee ilmaha:

Magaca hore iyo ka danbe ee ilmaha:

## För personal

Signatur:

Datum:

